



Countywide Planning Policies

Economy



King County

Dulmarka

Cutubka Economy (Dhaqaalaha) ee **Countywide Planning Policies (CPPs, Xeerarka Qorshaynta Degmada oo Dhan)** ayaa taageera dhaqaale kobcaaya, adag, oo kaladuwan dhammaan degmada. Xeerarkan ayaa taageera oona dhaqan gasha [Regional Economic Strategy \(Xeelada Dhaqaalaha Gobalka\)](#), xeelada balaaran ee dhaqaalaha gobalka.

CPP yada cutubka Economy ayaa ka hadlaaya doorarka dawlada hoose iyo masuuliyadaha taageerida abuurista ganacsiga, haynta, iyo balaarinta. CPP ayaa sidoo kale dhiiri gelinaaya talaabooyinka lagu yaraynaayo laguna koobaayo sinaan la'aanta dhaqaalaha laguna hubinaayo in dhaqaaluhu uu fursado cadaalad leh siiyo dhammaan dadka, gaar ahaana inta lagu jiro hoos u dhacyada iyo soo kabashada.

Marka lagu daro taageerida badqabka dhaqaalaha ee deegaannada degmada oo dhan, xeerarka ayaa taageera yoolalka la xariira si kor loogu qaado tayada nololaha, loo abuurto bii'o caafimaad leh, loona hayo khayraad dabiici ah iyo shaqooyinka la xariira.

Isbadelada Xeerka

Isbadalada lagu taliyay ee CPP ee ku jira cutubka Economy ayaa ka hadlaaya isbadelada xeerka gobalka, sharciga gobalka, iyo sinaanta dhaqaalaha degmada oo dhan.

Isbadalaan lasoo jeedshay ayaa ka hadlaaya sinaanta ayagoo xoojinaaya adkeysiga dhaqaalaha, difaacida ganacsiyada dhaqan ahaan muhiimka ah, iyo in laga hortago lana yareeyo barakaca dhaqaalaha, gaar ahaana bulshooyinka Black, Indigenous, and other communities of color (Madoowga, asaliyiinta, iyo bulshooyinka kale ee aan cadaanka ahayn).

Isbadalada lagu sameeyo CPP ayaa sidoo kale dhiiri gelinaaya hormarinta shaqaalaha, iskaashiga barnaamijyada waxbarashada, iyo taageerida abuurista iyo joogtaynta shaqooyinka mushaarka heerka dhexe dhammaan degmada.

Xeerarka cusub ayaa hagaaya maamulada maxaliga ah si ay u abuuraan xariir adag oo ay ka abuuraan shaqada iyo guryaha, xaqiijinta in dad badan oo deegaanku helaan dookhyo ah ku helayaan shaqooyin mushaar fiican, yaraynaaya waqtiyada safarka, iyo abuurista bulshooyinka ganacsi oo kajira dhammaan degmada.

Saamaynada Isbadelada Xeerka

- Wuxuu taageeraa abuurista iyo haynta dhaqaale kaladuwan oo diirada saaraaya mushaarka heerka dhexe.
- Waxa uu adkeeyaa xariirka u dhexeeya shaqada iyo guryaha ayadoo la dhiiri gelinaayo tiro badan oo fursadaha shaqada oo guryaha u dhaw.
- Go'aannada maal geshiga tooska ah ee bulshada si loo difaaco loogana fakaro saamaynada ku dhacaaya degmooyinka ganacsiyada dhaqanka muhiimka u ah.
- Waxay xoojisa taageerada shaqooyinka baahida ugu badan u qaba difaaca, ayna ku jiraan kooxaha ganacsiyada muhiimka ah iyo ganacsiyada yaryar ee u nugul isbadelka.
- Waxay dhiiri gelisaa qorshaynta hoos u dhaca ganacsiga iyo siinta taageerooyin toos ah si loo yareeyo sinaan la'aanta.

Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, fadlan iimeel u dir gmpc@kingcounty.gov ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPP waa taxanayaalka xeerar maamula ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorshaynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaaloooyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuurto xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalo kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo [VISION 2050 \(HIGSIGA 2050\)](#).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaagaan](#).